Xeerka JB-R1: Nidaamka Baaritaanka Cabashooyinka Ardayda oo Xaqiraada ama Dhibaateynta ah

Dugsiyada Bulshada Denver (“Degmada”) waxay bixineysaa deegaan waxbarasho oo aan laga heleynin xaqiraad sharci daro ah iyo dhibaateyn. Degmada waxay si degdeg ah ugu jawaabeysaa walaacyada iyo cabashooyinka xaqiraada sharci darada iyo/ama dhibaateynta; talaabo ka qaadida oo jawaabta ah goortii xaqiraad sharci daro ah iyo/ama dhibaateyn aad ogaatid; ku soo rog xayiraado ku haboon dambiyada oo nidaam dacwad-ba-dacwad ah; iyo ilaalinta asturida dhammaan kuwa kuwa ku lugleh xaqiraada sharci darada ah iyo/ama cabashooyinka dhibaateynta sida laga rabo sharciga dawlada iyo federaalka. Goortii ay ku haboontahay, cabashada waxaa loo gudbinayaa fullinta sharciga oo baaritaan ah.

Degmada waxay ansixisay nidaamyada xiga oo si degdeg ah iyo si cadaalada ah loo sheego walaacyada iyo cabashooyinka ku saabsan xaqiraada sharci darada ah iyo/ama dhibaateynta. Cabashooyinka waxaa loo gudbin karaa hadal ahaan ama qoraal.

Faahfaahinta

1. “Sarkaalka Cadeecida Ardayda” waxay la mid tahay Agaasimaha Fullinta Adeegyada Ardayga ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda kaas oo u xilsaaran in ay qabato cabashooyinka eedeyaha xaqiraada sharci darada ah iyo dhibaateynta.

2. “Shaqsiga dhibanaha ah” waa ardayga ama waalidka ama masuulada ardayga ee ka hooseeya 18 oo matalayo ardayga sida tooska ah ay u saameysay iyo/ama marqaatiga ka ah eeda xadgudubka ee xeerarka Guddiga oo mamnuucayo xaqiiraada sharci darada ama dhibaateynta ah.

3. “Dhibaateynta” waa wax walbo oo aan la jecleen, colaada, iyo weerarka afka ah, qoraalka, ama anshaxa muuqaalka oo ku saleysan ama ku socota qofka sharci Heer Ilaalsan ah oo: (1) sababayo muuqaalka, dareenka, ama waxyeelada maskaxda ama waxyeelada hantida; (2) aad ayay ugu fillantahay, joogta ah, ama balaaran karto oo saameyn karto kartida shaqsiyaadka oo uga qeybqaato ama ka faa'ido barnaamijka waxbarashada ama hawlaha ama abuuro cabsi gelin, colaad, ama halis deegaanka ah; ama (3) si weyn u carqaladeeyo habsamida hawlgalka dugsiga.

   a. Anshaxa dhibaateynta waxay noqon kartaa noocyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin laakin aan ka xadidneen:
      i. Talaabooyinka afka ah iyo magac-ugu yeerista;
      ii. Farshaxan buuxa iyo qoraalo qoran, oo ku jirto isticmaalka taleefonada ama intarneetka; iyo/ama
      iii. Anshaxa kale oo hanjabaad jirka ah, waxyeelo, ama yasid.

Sarkaalka Cadeecida Waajibaadyadada Ardayga

Sarkaalka Cadecida Ardayga ayaa masuul ka noqonayo saameynta baaritaanka iyo xiriirinta dhammaan nidaamyada cabashooyinka iyo geedi socodka wixii eedo xadgudub oo

federaalka ama qaaynuunka ama nidaamka Guddiga oo mamnuucayo xaqiraada sharci darada ah iyo dhibaateynta.

Sarkaalka Cadeecida Ardayda Degmada waa:

Agaasimaha Fullinta
Adeegyada Fullinta
Dugsiyada Bulshada Denver
1860 Lincoln St.
Denver, CO 80203
Taleefon: 720-423-3437

Dhibaateynta Galmada Mamnuucan

Talaabooyinka Galmo aan raali laga aheyn, codsiyada ixsaanka galmada, ama hadal ah, aan hadal-aheyn, ama dhaqanka jirka ee dabeecada galmada waxay noqoneysaa dhibaateynta galmada, xitaa hadii dhibaateeyaha iyo ardayga la dhibaateeyay ay isku jinsi yihiin iyo hadii ardayga diido ama diidin ama u gudbiyo dhibaateeyaha, goortii:

1. Gudbinta dhaqan noocaas oo kale waxaa lagu sameeyay midkood muddo cad ama si dadban ama sharuuda ka qeybqaadashada ardayga ee barnaamijka waxbarashada ama hawlaha;
2. U gudbinta ama diidmada dhaqan noocaas ah oo ardayga u isticmaalay sida ku saleysan go'aamada waxbarashada oo saameynayo ardayga; ama
3. Dhaqan noocaas ah waa darnaasho ku fillan, joogta ah, ama fidi karto sida midaas waxay yareysaa kartida ardayga uu uga soo qeybgalayo ama uga faa'idayo barnaamijka waxbarashada ama hawlaha ama waxay aasaastaa colaad ama jawi waxbarsho fool xun. Dhacdo hal mar ah oo u koradha heerka dhibaateynta, wa in ay ahaataa mid daran.

Dhaqan kasta oo dabeecada galmada ah oo ay ku sameeyeen ardayda xubin shaqaale ama xubin shaqaale ku sameeyeen ardayda waxaa loo qaadanayaa in aysan aheyn mid raali laga yahay iyo waxay noqoneysaa dhibaateynta galmada.
Ficilada afka ah ama gardarada jirka, cabsi gelinta, ama colaada ku saleysan jinsiga, laakin aan ku shaqo laheyn anshaxa dhaqanka galmada waxay sidoo kale noqoneysaa dhibaateynta galmada.

Dhibaateynta galmada sida lagu qeexay kor waxaa ku jira, laakin kama xadidno:

1. Galmada-u jaheysan afka “qiyaanada,” cayda, ama dhibaateynta;
2. Cadaadiska hawlaha galmada;
3. Aflagaadada isdaba jooga ah oo qofka ay saameysay galmada;
4. Taabashada aan raaliga laga aheyn, sida salaaxa, qanjaruufada, ama taabshada joogtada ah oo jirka qof kale ah;
5. Talada ama dalbashada hawlaha galmada, oo ay la jirto hanjabaad toos ah ama aan toos aheyn oo la xiriiro heerarka qofka ama walaacyada shaqsiga la mid ka ah; ama
6. Xad gudubka galmada.

Nidaamka Cabashada

Shaqsiga dhiban waxaa lagu dhiirogelinayaa in uu si degdega ah u soo wargeliyo dhacdada maamulaha, la taliyaha, macalinka, ama Sarkaalka Cadeecida Ardayga adigoo isticmaalayo foomka AC-E2: “Foomka Cabashada Xaqiraada/Dibaateynta.” Dhammaan wargelin ayay helaan macalimiinta, la taliyaasha, masuulada, ama shaqaalaha kale ee degmada waxay si degdega ugu soo gudbinayaan Sarkaalka Cadeecida Ardayga. Hadii Sarkaalka Cadeecida Ardayga uu yahay shaqsiga lagu eedeeyay in uu sameeyay dhaqan mamnuuc ah, cabashada waa in loo gudbiyaa Kormeeraha guud, iyo Kormeeraha guud waa in uu u xilsaaraa Sarkaal kale oo Cadeecida Ardayda si loo baaro arinta.

Shaqsi walbo oo Dhibana ah wuxuu u gudbin karaa Sarkaalka Cadeecida Ardayga cabasho ku qasbeysa Degmada, arday kale ama shaqaale kasta ee dugsiga ah xaqiraad sharci daro ah iyo dhibaateyn. Cabashooyinka waxaa lgu diyaarin karaa hadal ahaan ama qoraal. Dadka jecel in ay diraan cabasho qoraal ah waa in lagu dhiiro geliyaa in ay isticmaalaan foomka AC-E2: “Foomka Cabashada Xaqiraada/Dibaateynta.”

Dhammaan cabashooyinka kale waa in ay ku jiraan sharaxaad faahfaahsan oo dhacdada lagu soo eedeeyay, taariiqda ay dhacday dhacdada eedeynta, iyo magacyada dhinacyada ku lug leh, oo ay ku jiraan marqaati walbo. Cabashada waa in lagu sameeyaa sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah dhacdada kadib.

Sarkaalka Cadeecida Ardayga waa in uu siiyaa Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha ku eedeeyay xaqiraad sharci daro ah iyo dhibaateyn sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogal macquul ah, laakin yay ka daahin 15 maalmood oo dugsi ah ee ku xiga helida cabashada ee Degmada si loo helo faham cad oo ku saleysan cabashada.

5 maalmood gudaheed oo dugsi ah kulanka hore ee Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha ku eedeeyay, Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu isku dayayaa in uu la kulmo shaqsiga eedeysan in uu ku biiro dhaqanka la mamnuucay iyo, hadii ardayga, waalidkiisa/masuulkiisa ama waalidkeeda/masuulkeeda si loo helo jawaabta cabashada. Qofka noocaas oo kale ah waxaa la soo wargelinayaa dhammaan eedeymaha ee, xukunka Sarkaalka Cadeecida Ardayda, waa muhiim in la gaaro siideyn sax ah oo warbixinta alaabta ama hadii kale xalinta cabashada.

Kulamada hore, Sarkaalka Cadeecida Ardayga waa in uu u sharaxaa goobaha talaabooyinka rasmiga ah iyo kuwa aan aheyn, sheeg sharaxaad nidaamka cabashada, iyo faahfaahi in labadaba dhibanaha iyo shaqsiga eedeysan in ay kulug lahaayeen dhaqan mamnuuc ah waxay xaq u leeyihiin in ay isaga baxaan nidaamka aan rasmiga aheyn iyo codsadaan xalin rasmi ah oo arimaha waqti kasta ah. Sarkaalka Cadeecida Ardayga sidoo kale waa in uu sharaxaa in hadii ama shaqsiga uu gudbiyo cabasho qoraal ah ama hadii kale codsadaa talaabo, Degmada waxaa si sharci ahaan ah looga rabaa in ay talaabooyin qaadaan oo lagu saxayo sharci darada ama dhibaateynta iyo ka hortaga dhacdada xaqiraada sharci darada ah, dhibaateynta, ama aargoosiga ka soo horjeedo qof walbo oo soo wargeliyo ama ka qeybqaato baaritaanka. Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu sidoo kale u sharaxayaa in codsi walbo oo qarsoodi ah waa in la sharfaa ilaa waqti dheer oo saameynta sidaasna ma ka joojineyso Degmada ka jawaabida si wax ku ool ah si looga mamnuuco dhaqanka la mamnuucay iyo dhaqanka mustaqbalka la mamnuucayo.

Talaabada aan rasmiga aheyn

Hadii Shaqsiga Dhiban iyo/ama shaqsiga eedeysan ay galaan codsiyada dhaqanka la mamnuucay oo xaalada lagu xalinayo qaab aan rasmi aheyn iyo/ama Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu aaminsanyahay arinta in ay ku haboontahay xalin noocaas ah, Sarkaalka Cadeecida Ardayga wuxuu isku dayayaa in uu ku xaliyo arinta si aan rasmi aheyn oo la isticmaalayo dhaxdhaxaadin, la talin, ama qaab kale oo aan edbin-laheyn. Hadii labada dhinac ay dareemaan in xal lagaaray iyadoo la isticmaalayo nidaamka aan rasmiga aheyn, kadibna talaabo cabasho dheeraad ah ma ahan in la sameeyo. Ma jiro dhinac lagu qasbayo in la xaliyo cabasho xaqiraad sharci daro ah ama dhibaateyn aan rasmi aheyn iyo dhinacyada midkood ayaa codsan karo in la soo afjaro nidaamka aan rasmiga aheyn xili kasta. Xalka aan rasmiga aheyn looma isticmaalayo in lagu wado cabashooyinka ka soo horjeeda shaqaalaha dugsiga iyo waa in aan loo isticmaalin inta u dhaxeyso ardayda meesha dambiga quseeyo weerarka galmada ama ficilo kale oo xadgudub ah.

Tallaabada Rasmiga ah

Hadii xalin aan rasmi aheyn aysan ku habooneyn, aan la heli karin, ama aan lagu guuleysan, Sarkaalka Cadeecida Ardayga ayaaa si degdeg ah u baarayo eedeynta si loo go'aamiyo hadii iyo/ama ilaa heerkee, xaqiraad sharci darada ah ama dhibaateynta ay dhacday. Sarkaalka Cadeecida Ardayda wuxuu tixgelinayaa noocyada xiga oo warbixin ah oo lagu go'aansanayo hadii xaqiraada sharci darada ah ama dhibaateynta ay dhacday:

1. Qoraalada marqaati walba oo dhacdada eedeynta ah;
2. Cadeynta ku saabsan kalsoonida qaraabada oo dhinacyada ah way ku jiraan;
3. Cadeymaha qaraabada oo hadii shaqsiga eedeysan uu ku lug lahaa dhaqan mamnuuc ah oo lagu helay in uu ku lug lahaa dhaqan la mamnuucay oo ka soo horjeeda dadka kale;
4. Cadeynta Shaqsiga Dhiban iyo/ama dareemaha dhibanaha eedeeyay ama bedelka dabeecada oo xiga eedeynta dhaqanka la mamnuucay;
5. Cadeynta ku saabsan hadii dhibanaha eedeeyay iyo/ama shaqsiga la dulmiyay uu talaabo qaado uu uga cabanayo dhaqanka;
6. Cadeymaha iyo qoraalada marqaatiyada ama marqaatiyada ay soo bandhigeen dhinacyada ku lug leh;
7. Cadeymaha kale ee markaas la keenay, iyo/ama
8. Wixii kale oo cadeyn loo arko oo la xiriira Sarkaalka Cadeecida Ardayga.

Go'aaminta hadii dhaqanka uu yahay ku xadgudub sharciga ama xeerka, dhammaan xaaladaha la xiriira waxaa tixgelinayo Sarkaalka Cadeecida Ardayga, oo ay ku jiraan:

1. Heerka oo ay saameysay dhaqanka waxbarashada hal ama arday badan;
2. Nooca, joogtada, iyo mudada dhaqanka;
3. Aqoonsiga iyo xiriirka u dhaxeeyo shaqsiga lagu eedeeyay oo ku lug lahaaday dhaqanka la mamnuucay iyo Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha eedeeyay;
4. Tirada shaqsiyaadka lagu eedeeyay in ay ku lug lahaayeen dhaqanka la mamnuucay iyo tirada dhibanayaasha ee dhaqanka la mamnuucay;

5. Da'da shaqsiyaadka lagu eedeeyay in ay oo ku lug lahaayeen dhaqanka la mamnuucay iyo Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha eedeeyay;
6. Cabirka dugsiga, goobta dhacdada, iyo xaalada guud ee ay ka dhacday; iyo/ama
7. Dhacdooyinka kale ee dugsiga.

Sarkaalka Cadeecida Ardayda ayaa diyaarinayo wargelin qoraal ah oo wadato natiijooyin iyo talooyin, oo ay kujiraan laakin aan ka xadidneen talaabada edbinta la soo jeediyay oo ardayda iyo/ama shaqaalaha sida ku haboon iyo taageero Shaqsiga Dhiban, iyo ugudbiyo wargelinta Kormeeraha guud ama wakiilka Kormeeraha oo 15 maalmood gudahood oo dugsi ah oo ku xiga kulanka hore ee sarkaalka Cadeecida Ardayda oo cabashada ama 15 maalmood oo dugsi ah oo ku xiga joojinta xalinta nidaamka kale ee aan rasmiga aheyn. Dhaqanka dabeecada galmada oo si toos ah loo faray ardayga waa in ay, ku haboonaataa xaaladaha, la soo wargeliyay sida ku xadgudubka carruurta oo ay baarayaan maamulada ku haboon oo waafaqsan sharciga quseeyo iyo xeerka Guddiga. Ogolaanshaha heerka sare ee federaalka iyo sharciga dawlada, sarkaalka Cadeecida Ardayga waa in uu u cadeeyaa dhammaan dhinacyada, oo ay ku jiraan waaladiinta/masuulada oo dhammaan ardayda ku lug leh, qoraal ahaan oo natiijada ugu dambeysay ee baaritaanka iyo dhammaan talaabooyinka ay ku qaadeen Degmada 5 maalmood gudahood oo xiga go'aanka Sarkaalka Cadeecida Ardayga. Degmada waa in ay fullisaa talooyinka laga helay wargelinta Sarkaalka Cadeecida Ardayga.

Hadii Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha eedeysan uu diido natiijooyinka Sarkaalka Cadeecida Ardayga iyo talooyinka, Shaqsiga Dhiban iyo/ama dhibanaha eedeysan wuxuu racfaan ka qaadan karaa go'aanka Sarkaalka Cadeecida Ardayga iyadoo loo gudbinayo racfaan qoraal ah Kormeeraha ama wakiilkiisa/wakiilkeeda 10 maalmood gudahood oo kalandarka ah oo helida ogeysiinta natiijooyinka ugu dambeeyay ee baaritaanka. Racfaanka qoraalka ah waa in ay ku jirtaa wixii cadeyma dheeraad ah oo lagu tixgelinayo iyo waa in ay sheegtaa sharxaada racfaan qaataha diidmooyinka iyo go'aanka Sarkaalka Cadeecida Ardayga. Kormeeraha guud ama wakiilkiisa/wakiilkeeda ayaa dib u eegayaan cadeynta iyo ugudbinayaan qoraal wargelinta ugu dambeyso ah oo xaqiijineyso ama bedelista go'aanka Sarkaalka Cadeecida Ardayga iyo soo jeedinta talooyin dheeraad ah sida ku haboon. Go'aanka Kormeeraha ama wakiilkiisa wuxuu noqonayaa kii ugu dambeeyay.

Wakiilada ka Baxsan

Cabashooyinka la xiriira xadgudubyada Cinwaanka VI (jinsiyad, asalka dhalasho), Cinwaanka IX (jinsiga/dheddig-labood), ama Qeybta 504/ADA (curyaanka ama itaal daran) waxaa si toos ah looga buuxin karaa Xafiiska Xaquuqda Bulshada, Waaxda Waxbarashada Mareykanka, 1244 North Speer Blvd., Suite 310, Denver, CO 80204.

Tixraaca Sharciga.:

Cinwaanka IX ee Bedelada Waxbarashada, 20 U.S.C. § 1681
Cinwaanka VI ee Xeerka Xaquuqda Shicibka, 42 U.S.C. § 2000d -R1
Warbixinta Dhaqnka Xeerka Xaqiraadla'aanta, 42 U.S.C. § 2000ff et seq.
Xeerka Fursadaha Waxbarashada Simman, 20 U.S.C. §1701-1758
C.R.S. § 2-4-401(13.5)

C.R.S. § 22-32-109(1)(kk)(II)
C.R.S. § 22-32-110(cc) iyo (dd)
C.R.S. § 22-61-101
C.R.S. § 24-34-301 et seq.
C.R.S. § 24-34-601 et seq.

Tixraaca Sharciga.:
JB – Fursadaha Waxbarashada Simman iyo xaqiraadl'aanta
La ansixiyay: Oktoobar 23, 2014